

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**  
**GOLAHA WADATASHIGA QARAN (GWQ)**

**WAR-MURTIYEED**

**27-31 October 2022**

**Muqdisho – Soomaaliya**

*M. di*

*Adhū*

*AHO*

*SJ*

*\_\_\_\_\_*

*Jusere.*

*73110  
7/20/22*

## HORDHAC

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Dr. Xasan Sheekh Maxamuud ayaa guddoomiyey shirka 3aad ee Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) kaas oo lagu qabtay Muqdisho 27-31 October 2022. Shirka waxaa ka soo qaybgalay Ra'iisul Wasaaraha XFS Mudane Xamsa Cabdi Barre, Ra'iisul Wasaare K/xigeenka XFS Mudane Saalax Axmed Jaamac, Madaxweynaha Puntland Mudane Saciid Cabdullaahi Deni, Madaxweynaha Jubbaland Mudane Axmed Maxamed Islaan, Madaxweynaha Koonfur Galbeed Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed (Lafta-gareen), Madaxweynaha Galmudug Mudane Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor), Madaxweynaha Hirshabeelle Mudane Cali Guudlaawe Xuseen iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir Sheekh Yuusuf Xuseen Jimcaale (Madaale).

Ugu horeyn Golaha Wadatashiga Qaran wuxuu tacsii u dirayaa shacabka Soomaaliyeed, ehelada iyo qoysaska ay ka baxeen dadkii ku shahiiday weeraradii argagixiso guud ahaan dalka gaar ahaana weerarkii 29 Oktoobar ee agagaarka Zoobe ee magaalada Muqdisho. Sidoo kale, Goluhu wuxuu Allah uga baryayaa inta dhaawacantay inuu u booga-dhayo, inta ku hanti beesheynta bedel kheyr qaba Alle siiyo. Goluhu wuxuu canbaareynayaa gummaadka ay khawaarijtu ku hayso ummadda Soomaaliyeed ee Muslimiinta ah.

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

## BOGAADIN

Golaha Wada-tashiga Qaran waxa uu:

- Bogaadinayaa guulaha isdaba joogga ah ee ay gaareen Ciidanka Qalabka-Sida oo kaashanaya kacdoonka Shacabka Soomaaliyeed ee guud ahaan dalka lagaga ciribtirayo khawaarijta.
- Ammaaney gargaarka bani-aadannimo iyo gurmada dadka ay abaaruhuu saameeyeen ee ay waddo XFS oo kaashaneysa shacabka, DXDF iyo beesha caalamka.
- Goluhu wuxuu bogaadinayaa dhaqanka deganaanshiyaha siyaasadeed, wada-nolaanshiyo iyo dimuqraadiyadda ee ay Somaliland ku soo caano maashay, wuxuuna ugu baaqayaa madaxda iyo shacabka Somaliland inay ilaashadaan xasiloonida iyo nabadda.
- Bogaadiyay ganacsatada Soomaaliyeed iyo Dowladda Puntland ee hirgeliyey dekada Garacad oo noqotay isku-tashi ku dayasho mudan.
- Bogaadinayaa dadaalka ay Dowladda Puntland ugu jirto horumarinta hannaanka dimuqraadiyadeynta iyo qabashada doorashooyin qof iyo cod ah.
- Bogaadinayaa dadaalada Dowladda Federaalka Soomaaliya ay ugu jirto xoojinta xiriirka kala dhexeeya saaxiibada caalamka.

## **QODOBADA SHIRKA KA SOO BAXAY**

Iyada oo la tixraacayo qodobadii ka soo baxay Warmurtiyeedyadii shirarkii Golaha Wadatashiga Qaran ee 12 June iyo 12 September 2022, Goluhu wuxuu ka wada hadley kuna heshiiyey qodobada soo socda:

### **1. SUGIDDA AMNIGA IYO LA DAGAALANKA ARGAGIXISADA**

- Goluhu wuxuu isla qaatay ka ciribtirka kooxaha khawaarijta dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Goluhu wuxuu isku raacey in howlgallada la waafajiyo istratejiyad qaran ee la dagaalanka khawaarijta la iskuna dubarido dadaalada kala duwan.
- Goluhu wuxuu isla qaatay dhaqan-gelinta heshiiska Qaab-Dhismeedka Amniga Qaranka ee la saxiixay April 2017, wixii farsamo ahna waxaa ka shaqayn doona guddi farsamo.
- Goluhu wuxuu dhiirigelinyaa dardargelinta qorshaha kala guurka ee ciidamada qaranka ay kagala-wareegayaan mas'uuliyadda amniga ciidamada ATMIS si dhameystiran.

### **2. GURMADKA ABAARAHA IYO LA TACAALIDDA SAAMEYNTA ISBEDDELKA CIMILADA**

- Goluhu wuxuu diiradda saaray saamaynta abaaraha soo noqnoqonaya ee dalka ka jira iyo raadka ay ku reebaayaan hab nololeedka bulshada Soomaaliyeed. Goluhu wuxuu hay'adaha gargaarka farayaa dardargelinta gurmada abaaraha.
- Goluhu wuxuu sidoo kale isla qaatay baahida weyn ee loo qabo maareynta iyo la tacaalidda saameynta is-baddelka cimilada iyo dhisidda kaabayaasha u adkaysiga afooyinka.

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten signature*

*Handwritten date: 7/31-10/2022*

### 3. DARDARGELINTA DIB-U-EEGISTA DASTUURKA

- Goluhu wuxuu isla qaatay in mudnaan gaar ah la siiyo qodobada wada-xaajoodka siyaasadeed u baahan si loo dhameystiro dib-u-eegista dastuurka KMG.
- Goluhu wuxuu isku raacay in XFS iyo DXDF ay soo dhammaystiraan xubnaha ka dhimman Guddiyada u xilsaaran Dib-u-eegista Dastuurka KMG.

### 4. DIMUQRAADIYEYNTA IYO DOORASHOYINKA

- In dalka laga dhaqan-geliyo nidaamka xisbiyada badan iyadoo dib loo milicsanayo xeerarka xisbiyada iyo doorashooyinka.
- In dalka oo dhan laga hirgeliyo doorashooyin xor ah oo hufan kuna saleysan codbixiyeyaal diiwaan-gashan iyo xisbiyo u tartama goleyaasha heerarka kala duwan.
- In dalka laga qabto laba doorasho; mid Heer Federaal ah iyo mid Dowladaha Xubinta ka ah Dowladda Federaalka.

### 5. JADWALKA IYO HABRAACA SHAQO EE GOLAHA WADATASHIGA QARAN

- Goluhu wuxuu isku raacay in uu samaysto habraac shaqo oo qeexaya hannaanka loo marayo heshiisyada, qaab-dhismeedkiisa, hawlaha golaha, qodobada wada-xaajoodyada iyo dhaqan-gelinta go'aamada Golaha.
- Goluhu wuxuu isku raacay in labada shir ee soo socda ay qabsoomaan Disember 2022 iyo Febraayo 2023.

**Dhammaad**


5

731-109  
20/22

## SAXIIXAYAASHA WAR-MURTIYEEDKA

1. Mudane Xamsa Cabdi Barre

Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda XFS




2. Mudane Saalax Axmed Jaamac

Ra'iisul Wasaare K/xigeenka XFS




3. Mudane Saciid Cabdullahi Deni

Madaxweynaha Dowladda Puntland Soomaaliya




4. Mudane Axmed Maxamed Islaam

Madaxweynaha Dowladda Jubaland Soomaaliya



5. Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed (Laftagareen)

Madaxweynaha Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya



6. Mudane Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor)

Madaxweynaha Dowladda Galmudug Soomaaliya



7. Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe)

Madaxweynaha Dowladda Hirshabeelle Soomaaliya



8. Sheekh Yuusuf Xuseen Jimcaale (Madaale)

Guddoomiyaha Gobolka Banaadir

